

Qaybaha keliyaynta Alle (Tawxiidka)

Keliyaynta Alle (Tawxiidku), waa in Alle (C.W) loo keliyeeyo waxa oo uu gaarka la yahay, oo ah: rabbinimadiisa, Ilaahnimadisa iyo magacyadiisa iyo tilmaamahiisa wanaagsan

Jaadadka (noocyada) keliyaynta Ilaahayna waa saddex

U-keliyaynta (Ilaahay) magacyadiisa iyo tilmaamahiisa

Waana in Ilaahay (C.W) loo keliyeeyo wixii uu naftiisa ku magacaabay ama ku tilmaamay, kitaabkiisa gudihiisa (Qur'aanka), ama carrabka rasuulkiisa N.N.K.H (Axaadiista). Taana macnaheedu waa; in Ilaahay loo sugo wixii uu naftiisa u sugay, lagana diido wixii uu naftiisa u diiday, iyadoon la leexinayn (macnihiisa) ama aan la macno-siibayn, iyo iyadoon la qaabaynayn ama aan lagu metelayn (uunkiisa).

U-keliyaynta Ilaahnimada

Waana in Ilaahay (C.W) loo keliyeeyo cibaadada, ama in loo keliyeeyo falalka ay adoomihiisu samaynaayan.

U-keliyaynta Rabbinimada

Waana in Ilaahay (C.W) loo keliyeeyo falalkiisa. Ama in Ilaahay(C.W) loo keliyeeyo abuurka, boqortooyada iyo maamulka (koonka).

Heerarka Diinta ee saddexa ah

Wanaajinta (Iksaan)

(Iksaankuna) waa; in aad Ilaahay (C.W) u caabuddo sidaad aragtid oo kale, haddaadna (Ilaahay) arkayna, isaga ayaa ku arka.

Iksaankuna waxa uu leeyahay hal tiir, waxaana hoos tagal abo heer:

- 1)(Mushaahadah); waana in aad Alle u caabuddo sida in aad aragto oo kale.
- 2)(Muraaqabah); haddaadna Alle arkayn, isaga ayaa ku arka.

Rumaynta (limaanka)

(limaankuna) waa; eray carrabka laga dhaho, rumayn qalbiga laga rumeeyo iyo shaqo xubnaha jidhka laga qabto. Wuu kordhaa wuuna is dhimaa.

Tiirarka Rumaynta (limaanka):

- 1)Rumaynta Ilaahay.
- 2)(Rumaynta) malaa'igtiisa.
- 3)(Rumaynta) kutubtiisa.
- 4)(Rumaynta) rusushiisa.
- 5)(Rumaynta) Maalinka danbe (Qiyaamaha).
- 6)Iyo in la rumeeyo qadarka, khayrkiisa iyo sharkiisaba.

Islaamka

Waana in Ilaahay (C.W) loogu hogaansamo keliyayntiisa, loogu hogaansamo adeeciddiisa, iyo in laga beri noqdo Shirkiga iyo dadkiisa.

Tiirarka Islaamka

- 1)Labada Shahaado.
- 2)Salaadda oo la oogo.
- 3)Sakada oo lala yimaaddo.
- 4)Ramadaan oo la soomo.
- 5)Guriga Alle (Kacbada) oo la soo xajiyo, ruuxii awooda.

4 Qaybaha xarrimanayaasha (Muxaramaatka)

Denbiyada yaryar

(Waxay ka hooseeyaan denbiyada waaweyn). Denbiga weyn waxaa lagu tirtiraa denbidhaaf-dalabka (Istiqaarta). Denbiyada yaryar waxa ay noqdaan denbi weyn marka lagu adkaysto. Nebigu (N.N.K.H) waxa uu yidhi: "Iska ilaaliya denbiyada la liido; waayo qofka ayay ku kulmaan (aruuraan) ilaa ay ka halaagaan".

denbiyada waaweyn

(Waa wax kasta oo ay ka dhalato ciqaab gaar ah); sida sixirka, waalid inkaanimada, ribada, Sinada, khaniisnimada, beenta, cabidda khamrada, xatooyada, xanta, qudhgaynta naf uu Ilaahay xarimay wixii aan xaq ahayn, iyo in la cuno hantida agoonka.

Shirki yar

(Qofka diinta ka saari mayo, waxa uu ka weyn yahay (ka daran yahay) denbiyada waaweyn). Sida in uu qofku dhaho: (haddii Alle iyo adiguba yeeshaan, iyo in lagu dhaarto cid aan Ilaahay ahayn, istuska kiisa yar, qardhaasaha shirkiga ah, shimbiraysiga iyo baasaysiga, in la xidho baraarugta iyo wixii lamida), waa haddii uu qofku aamino in ay sabab u tahay in ay dhibta ka ilaalinayso ama ay isha ka dhawrayso

Shirki weyn

(Qofka diinta ayuu ka saarayaa, lagamana dhaafayo haddii u uku dhinto). Waxaana lagu qeexaa: in uu Ilaahay u yeelo u dhigme uu baryo sida uu Alle u baryo oo kale, ama uu ka baqo ama quud-darreeyo ama uu jeclaado mid lamid ah jacaylka Ilaahay, ama uu u leexiyo nooc ka mid ah noocyada cibaadada.